

# Dareemaha durugsan ee xididaha

Buug-yarahaan waxan uu sharxayaa waxa laga filayo marka lagugu sameynayo qallinka ee xannibaadyada dareemayaasha. Waxaa qoray dhakhaatiirta uu xil saaran suxdinta, bukaanada iyo wakiilada bukaanada, wada shaqaynta.

## Tusmada

Buug-yarahaan waxa uu sharaxayaa:

- Waxa ay tahay suuxinta neerfaха
- Sababta aad uga faa'iidaysu suuxintaas loogu talagalay qallinkaaga
- Sida ay u shaqaynayso
- Maxa xigi doona
- Halista iyo go'aan gaarista leysla wadaago.

## Ku saabsan xannibaadyada dareemayaasha

Xannibaadyada dareemayaasha waa duris suuxin ah oo loo qaato siddii loo kabuubyayn lahaa neerfaха ku xidhiidhsan qeybo ka mida jidha, tusaale ahaan, gacanta, ama lugta ama cagta. Suuxinta goobtu waxay suuxisaa fariimaha xanuunka waxaanay kabuubyo bilaa dhaqdhaqaaq ku sameysa qeybta jidhka , inkasta oo aad weli dareemi karto dhaqdhaqaaq iyo jiiditaan inta lagu jiro qallinka.

Xannibaadyada dareemayaasha ayaa loo isticmaali kara beddelka guud ee suuxinta xaaladaha qaarkood. Tani waxay si gaar ah faa'iidoo ugu leedahay bukaanadaa leh xaaldo caafimaad oo halista ey ku keeni karto suuxinta guud. Faa'iidon yinka kale oo suuxinta neerfaха loogu qaato qallinka waa inay leedahay halista yar oo ka iman karta dhibaatada ay leedahay suuxinta guud.

Xannibaadyada dareemayaasha waxaa sidoo kale lagu dari karaa suuxinta guud si loo maareyo xanuunka qallinka ka bacdi. Waxay ku siin kartaa xanuunka ilaa 24 saacadood qaliinka ka dib, inkastoo meelaha qaar laga yaabo inay dareemeen kabuubiyyada ilaa 48 saacadood.

Hurdeynta waxaa badanaa loo isticmaalaa suuxinta neerfaха si ay kaaga dhigto mid deggan oo hurdaysan inta lagu jiro qallinka. Hurdaynta waxay noqon kartaa mid fudud ama qoto-dheer waxaana laga yaabaa inad xasuusato wax kasta,

waxyaabaha qaar ama inaadan xasuusan waxba hurdaynta kadib. Wax badan oo ku saabsan suuxinta waxaad ka akhrisan kartaa buug-yarahayaga suuxinta ayaa lagu sharraxay kaas oo lagu heli karo luqado kala duwan halkan:

[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages)

Dhakhtarkaaga suuxinta wuxuu kaa caawin karaa inaad go'aansato tan adiga kuugu haboonaan karta.

### **Defoyinka dareemaha durugsan ee xididaha**

- Xanuun baabi'iye wanaagsan qallinka kadib.
- Baahida yar ee loo qabo xanuunka dilaaga ah ee ay ku jiraan opioids ee muddada ah isla markii ba qallinka ka dib. Kuwani waxay kaa dhigi karaan xanuun waxayna keeni karaan calool istaag. Marar dhif ah ayay jirtaa khatarta qabatinka haddii aad muddo dheer qaadatid.
- Ka fogaanshaha suuxdinta guud, oo ay ku jiraan halisteeda iyo waxyelloyinkeeda. Dhibaatooyinka caadiga ah ee suuxinta guud waxaa ka mid ah jirro, cune xanuun iyo lulmo.
- Awood u lahaanshaha inaad kacdo oo aad dhaqdhaqaaq sameyso goor hore islamarkaana aad dhakhso uga baxdo cisbitaalka.

### **Xarunta caafimaad ee qiimeyn ta qallinka ka hor (qiimaynta hore)**

Haddii aad leedahay qallin qorshaysan waxa laga yaabaa in lagugu martiqaado xarunta qiimaynta qallinka ka hor dhawr toddobaad ama maalmo ka hor qallinkaga. Mararka qaar qallinka fudud, waxaa kusoo wici doona kalkaalisada caafimaadka si ay kuu waydiiso su'aalo dheeraad ah.

Fadlan soo qaado (ama diyaar u ahow wicitaanka taleefanka):

- soo qaado dhamaan dawooyinka aad hada qaadato iyagoo ku jira galkooda oo dhamaystiran
- haddii aad qaadato wax daawo ah si loo khafiifiyo dhiiggaaga, waa muhiim in qiimayn hore la sameeyo kooxdu way ogyihii arrintan si ay ugala hadlaan inaad u baahan tahay inaad joojiso qaadashada daawooyinkan ka hor qallinkaga
- macluumaad kasta oo aad ka haysato baaritaannadaada iyo daaweynta aad ka samaysay isbitaallada kale
- macluumaadka ku saabsan dhibaato kasta oo adiga ama qoyskaaga laga yaabo inaad kala kulanteen suuxintas
- cabirka dhiigaaga ee aad dhowaan iska qaadday.

Waxaad la kulmi kartaa dhakhtarka suuxinta ee cisbitaalka. Haddii kale waxaad kula kulmi doontaa dhakhtarkaaga suuxinta ee cisbitaalka maalinta qallinkaaga.

## Maalinta qalliinka

Cisbitaalka waa inuu ku siiyaa tilmaamo cad oo kusaabsan cunida iyo cabitaanka iyo qaadashada daawooyinkaaga. Waa muhiim inaad raacdoo tilmaamahan.

### Bilaabida suuxinta neerfaha

Caadi ahaan waxaa lagu geynayaa qol u dhow qolka qalliinka si xididdada neerfayaasha loo suuxiyo. Qalabka kormeerka ayaa la xidhiidhin doona si ay kooxda kormeerku ula socdaan xaaladaada inta lagu jiro qalliinka.

Maqaarka ku hareeraysan goobta duritaanka waa la nadiifin doonaa waxaana cirbad yar oo suuxdinta maxalliga ah loo isticmaali doonaa in lagu kabuubiyo maqaarkaaga - xoogaa yar ayay ku gubanaysa inta cirbadu dhex marayo maqaarka.

Kadib marka maqaarkua la kabuubyo, cirbado kala duwan ayaa loo isticmaalaa si loo sameeyo xannibaadda dareemayaasha. Dhakhtarka suuxinta ayaa sidoo kale isticmaali doona mashiinka uurku jirta si u arko halka neerfuhu ku jiraan kadibna ugu mudo daawada suuxinta meesha saxda ah.

Dadka intooda badani waxay durista u arkaan mid aan ka xanuun badnayn gelinta kaanoolaha (tuunbo jilicsan oo balaastig ah oo la geliyo xididka dhiiga).

Gacantaadu waxay bilaabi doontaa inay dareento diirimaad iyo xadanto ka hor inta ugu dambeyn ay dareento culeys iyo kabuubyo. Cirbadu caadi ahaan waxay qaadataa inta u dhexeysa 20 iyo 40 daqiqo inay shaqeyso. Dhakhtarka suuxinta wuxuu hubin doonaa dareenka aad ka dareemi karto qeybaha kala duwan. Laguma geyn doono tiyaatarka illaa dhakhtarka suuxinta uu ku farxo in suuxintu ay si fiican u shaqeynayso.

Haddii xannibaadda aysan si buuxda u shaqeyn, waxaa lagu siin doonaa suixin badan oo maxalli ah, xanuun baabi'in dheeraad ah, ama suixin guud.

### Inta lagu jiro qalliinka

Shaashad ayaa la dhigi doonaa si aanad u arkin qalliinka la sameynayo..

Waxaad awoodi kartaa inaad aaladaada sameecada dhagaha kaga dhageysato heeso inta lagu jiro qalliinka - waa inaad weydiisaa haddii ay taasi suurogal tahay.

Masraxa qalliinka waa meel mashquul badan - caadi ahaan waxaa jiri doona inta u dhexeysa shan ilaa sideed qof oo ku sugaran tiyaatarka, mid walbana wuxuu leeyahay doorkiisa u gaarka ah ee kaa caawinaya inuu ku daryeelo. Xubin ka mid ah kooxdaada suuxinta ayaa kula joogi doonta qalliinka oo dhan mararka qaarkood na xubnaha kale ee kooxda ayaa waliba kula hadli kara oo kaa caawin kara daryeelkaaga.

Haddii lagu hurdaysiinayo, waxaad noqon doonta mid degan oo hurdaysan. Waxaa laga yaabaa in lagaa siiyo ogsijiin iyadoo lagaa siiyayo maaskarada wajiga oo khafiifa. Waxaa laga yaabaa inaad xasuusato inaad ku jirtay tiyaatarka qalliinka, in kasta oo kuwani ay noqon karaan kuwo dhaylo ah.

Wax badan oo ku saabsan suuxinta waxaad ka akhrisan kartaa buug-yaraheena Sharaxaada suuxinta kaas oo halkan lagaga heli karo luuqado kala duwan:  
[www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages](http://www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages)

## Qallinka ka dib

Saamaynta xannibaadda neerfaha waxay socon kartaa ilaa 48 saacadood. Inta lagu jiro wakhtigan qaybta jidhka ee la suuxiyay waxay dareemi doonta culays badan waxaanay u baahan doonta in la taageero ilaa muruqyadu ay dib u bilaaban inay shaqeeyaan. Waxed u baahan kartaa qof kaa caawiya inaad fuliso hawlaha maalinlaha ah intaad kasoo ladnaanayso qallinka.

markay suuxinta neerfaha si dhamaaneyso waxaad farahaaga iyo suulasha ka dareemi kartaa mudis iyo cirbado. taasina waa mid caadi ah.

## Daryeelka dambe ee guriga

Ka hor intaan cisbitaalka lagaa saarin waxaa lagu siin doonaa maclumaad kaa caawinaya inaad guriga ku ladnaato. Waa inaad isticmaasho taageero kasta oo lagu siiyo islamarkaad guriga tagto. Tan sababteedu waa inaanad dareen buuxa ku lahaan doonin goobta qallinka, waanay fududaan kartaa inaad dhaawacanto. Kabuubyadani waxay caadi ahaan socon karaan ilaa 48 saacadood.

- Si gaar ah uga taxadar ilaha kulaylka, sida dabka ama hiitarka. Ma dareemi doontid kulaylka inta qaybta jidhka ka mid ahi ay kabuubyaysan tahay oo waxaa laga yaaba inaad gubato.
- Ka fogow isticmaalka mashiin ama qalab kasta, sida kildhiyaasha, qalabka feereynta iyo cunto karinta.
- Bilow inaad qaadato dawooyinka xanuunka kaa baabi'ya ka hor inta aanay xannibaadda kaa dhammaanin iyo sida uu cusbitaalku ku farayo. Tani waa muhiim maadama saamaynta suuxinta neerfuu ay si lama filaana u istaagi karto.

## Goorta ay tahay inaad caawimo waydiisato

Waxaad u baahan doontaa inaad caawimaad ka raadsato adeegyada caafimaadka degdeggaa ah haddii:

- aad dareento neefsasho la'aan la sharxi karin
- aad la kulanto xanuun daran oo aanay kiniinkaagu xakameyn karin.

Haddii xannibaadda aysan si buuxda u dhammaanin laba maalmood ka dib qallinka, waa inaad la xiriirtaa waaxda suuxinta adigoo wacaya lambarka ku qoran warqadahaaga sii deynta.

## Maclumaad dheeraada oo ku saabsan suuxinta neerfaha

RA-UK, oo ah bulshada takhasuska leh ee suuxinta gobolka, aaya soo saartay muuqaal maclumaad ah oo loogu talagalay bukaannada ku jira xannibaadyada dareemayaasha: Suuxinta neerfaha: muuqaal maclumaad ah oo loogu talagalay bukaanka: [www.ra-uk.org/index.php/patient-info-video](http://www.ra-uk.org/index.php/patient-info-video)

## **Halista iyo go'aan gaaris la isla wadaago**

Suuxinta casriga ah, oo ay ku jiraan xannibaadaha neerfaha, aad aye uu ammaanan yihiin. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira qaar ka mid ah waxyeellooyin caadi ah oo la xidhiidha xannibaadyada dareemayaasha, kuwaas oo aan caadi ahayn kuwo halis ah ama aan sii soconayn. Marar dhif ah oo badan suuxinta neerfaha waxay neerfaha ku sababi karaan dhaawac.

Macluumaad dheeraad ah oo badan oo ku saabsan halista waxaa laga heli karaa buugyaraheena halista ah Dhaawaca neerfaha ee la xidhiidha xannibaadda neerfaha ee durugsan.

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona halistu ay rumeysan yihiin inay aad kuugu muhiimsan yihiin. Waxay ka hadli doonaan oo kaliya halisaha aan caadiga ahayn haddii ay adiga kugu khuseeyaan.

## **Go'aan gaaris leysla wadaago**

Go'aan gaarista leysla wadaago waxay hubisaa in shakhsiyadka la taageero si ay u gaaraan go'aamo iyaga ku habboon. Waa hab wada shaqeyneed oo uu takhtarku ku taageero bukanka si uu go'aan oga gaadho daawaynta.

Wada sheekeysigu wuu isku keenaa:

- khibrada dhakhtarka, sida fursadaha daawaynta, caddaynta, halista iyo defooyinka
- waxa uu bukaanku si fiican u garanayo: dokhooda, durufahooda gaarka ah, yolalka, dhaqankooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

Wax badan ka ogow: [www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making](http://www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making)

Waa kuwan qaar ka mid ah qalabyada aad isticmaali karto si aad sida ugu fiican uga faa'iidaysato wada-hadalladaada aad la yeelato dakhtarkaa suuxinta ama qimaynta qallinka ka hor:

## **Doorashada qaab dhismeedka BUUNSHA caqli galka ah UK**

U isticmaal tan xasuusin ahaan si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan daweynta.

[https://bit.ly/CWUK\\_leaflet](https://bit.ly/CWUK_leaflet)

## **waydii waxda caafimaadka ee NHS seddex su'aalood**

Waxay siindoontaa xolashooyin badan oo ku saabsan daryeelkaga caafimaad.

[https://bit.ly/NHS\\_A3Qs](https://bit.ly/NHS_A3Qs)

## Xarunta Daryeelka Qalliinka Ka Hor (CPOC)

CPOC waxay soo saartay filman si ay kuugu sharaxdo waxa ay tahay go'aan qaadashada la isla wadaago.

[www.c poc.org.uk/shared-decision-making](http://www.c poc.org.uk/shared-decision-making)

## Su'aallaha aad jeelaan laheyd in aad weydiiso

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor (waxaad isticmaali kartaa tusaalooyinka hoose kadibna ku darso kuwaaga meesha bannaan ee hoose). Haddii aad rabto inaad la hadasho dhakhtarkaaga suuxinta kahor maalinta qalliinkaaga, la xiriir kooxda qiimaynta qalliinka ka hor kuwaas oo kuu diyaarin doona inaad taleefanka kula hadasho dhakhtarka suuxiyaha ama inaad ku aragtid xarunta caafimaadka.

- 1. Aniga ma leeyahay halis gaar ah oo iga iman kara suuxinta noocaan ah?**
- 2. Aniga ma leeyahay halis kordhaysa oo iga imaneeso suuxinta guud?**
- 3. Maxaa dhacaya haddii suuxintu ay shaqeyn weydo?**

## Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in maclumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno maclumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yaraahaan sidii hagge ahaan. Buug-yaraahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix

([www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali](http://www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali)).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. Tiayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta maclumaadka qaar.

## Noo sheeg sida aay kula tahay

Haddii aad hayso wax talooyin ah, fadlan imaylka ku soo dir:

[patientinformation@rcoa.ac.uk](mailto:patientinformation@rcoa.ac.uk)

### Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG  
020 7092 1500

**rcoa.ac.uk**

### Daabacadda saddexaad, Juun 2023

Buug-yaraahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano kadib laga bilaabo taariikhda la daabacay.

#### © 2023 Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta

Xaashidan waxa laga yaabaa in la koobiyeeyo si loo soo saaro agabka maclumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yaraahaan aad ku dabacato qoraal kale, waa inaad heshaa ogolaansho waana inaad kasaartaa qoraalkaaga waxii magaca ama calaamado, astaanta iyo sawirro ah. Wixii maclumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xirir.